



Ministry of Housing,  
Communities &  
Local Government

**Alistair Watters**

*Director, Grenfell Site & Programme*

**Ministry of Housing, Communities and Local  
Government**

2 Marsham Street

London SW1P 4DF

3 June 2020

Gacaliyaal dhammaantiin

Waxaan warqad idiinkugu soo qorayaa, idinkoo ah qoysas murugeysan iyo deggeneyaashii hore ee Grenfell Tower, si aan idiinku sheego shaqooyin ku saabsan amniga oo dhowaan laga qaban doono Tower-ka. Sida aad la socotaanba, dowladda ayaa la wareegtey lahaanshaha Tower-ka bishii Luuliyo 2019. Annaga ayaa mas'uul ka ah, waxaana naga go'an, in aan ka yeelno meel amni iyo nabad leh illaa go'aan laga gaarayo mustaqbalkeeda, iyo ka sameynta xusuusta ku habboon in lagu xusuusto kuwa noloshoodii ku waayey.

Waxaan soo raaciyey xaashi macluumaad oo qeexeysa shaqooyinkan muhiimka ah iyo sababta aan hadda u bilaabayno. Shaqooyinka waxaa loo fulin doonaa wejiyo isku xiga sanadka soo socda badanaana waxay ka koobnaan doonaan:

- Laga bilaabo dabayaaqada bishaan, howlaha hore ee horudhaca ah ayaa la qaban doonaa. Tan waxaa ka mid ah gaarsiinta qalabka goobta iyo ka qaadista qaar ka mid ah alaabada waaweyn goobaha la wadaago si qalabka meel la dhigo loogu banneeyo.
- Laga bilaabo Sibtembar, ka saarista alaabada culus iyo kuwa waxyeeloobey si loo yareeyo culeyska dhismaha saaran. Tan waxaa ka mid ah ka qaadista alaabada aan la soo cellin karrin ee guryaha ka imaaneyna, sida saxanada biyaha maraan, alaabada caddaanka ah iyo qalabka guryaha lagu rakibo oo ay ku jiraan saqafyada soo laalaada iyo tuubooyinka.
- Dabayaaqada dayrta, ka saarida asbestos - sidoo kale si loo yareeyo culeyska - iyo in la hubiyo sii amni ahaanshaha deganeyaasha deegaanka iyo sidoo kale kuwa ka shaqeeya dhismaha. Waxaan la shaqeyneynaa qandaraasle takhasus leh si aan u hubinno badbaadada dadweynaha inta lagu gudajiro alaab ka saarista.
- Taas kadib, rakibida dhismooyin cusub, si loogu kabo kuwii horey u jiray oo loo hubiyo xasilloonida Tower-ka ilaa go'aan laga gaarayo mustaqbalkeeda.

Waxaan fahamsannahay in ay shaqooyinkani yihiin kuwo xasaasi ah waxaanna doonayaa in aan si daacad ah idiinku sheego sababta ay u socdaan, si aan uga

jawaabo su'aalihiina una dhageysto wixii welwel ah oo aad ka qabi kartaan. Waxaan jeclahay in aan ku nuuxnuuxsado:

- In Tower-ka yahay mid nabdoon oo xasilloon Hawlahan lagama maarmaanka ah waxay ku saabsan yihiin xaqiijinta sii socoshada xasilloonideeda illaa go'aan laga gaarayo mustaqbalkeeda. Go'aankaasi waxaa keliya oo la qaadan doonaa iyadoo si dhow loogala hadlli doono idinka, bulshada deegaanka iyo khubarada madaxa bannaan.
- Bilooyinkii ku xigey masiibada ka dib, kooxda maareynta goobta madaxa bannaan waxay la shaqeeyeen qandaraasle takhasus leh si meesha looga saaro looguna celiyo alaabada shaqsiyeed ee dib loo soo celin karey, dib loo isticmaali karey ama muhiim u ahaa deganayaashii hore. Hawshaas hadda waa la dhammaystiray.
- Hawlahan ayaan faragelin ku sameyn doonin geedi socodka caddaaladda iyo isla xisaabtanka. Baaraha sababta dhimashada, booliska iyo baaraha guud ee Grenfell Tower dhamaantood waxay caddeeyeen in ay haystaan cadeymaha ay uga baahan yihiin Tower-ka iyo in ay ku qanacsan yihiin in ay howlaha bilowdaan.
- Keenista fikradaha iyo qorshayaasha xusuusta mustaqbalka waxaa hogaaminaya guddiga madaxa bannaan ee xusuusta. Waxaad kala xiriiri kartaa akhbaaraadkoodana kala socon kartaa adigoo iska diiwaangelinaya website-kooda: [www.grenfelltowermemorial.co.uk](http://www.grenfelltowermemorial.co.uk)

**Kooxda maareynta goobta ee Grenfell ayaa diyaar u ah wada hadallada shaqsiyeed** oo lala yeesho dhammaan qoysaskii hore ee deganaa Tower-ka, amaba xubnaha qoyska murugeysan, si ay u bixiyaan faahfaahin ku saabsan sida shaqooyinkani ay u saameynayaan guryaha. Waxaad kala xiriiri kartaa adigoo email ugu diraya [GrenfellTowerSite@communities.gov.uk](mailto:GrenfellTowerSite@communities.gov.uk) amaba taleefoon ka wacaya **0303 444 0011**. Waxaan sidoo kale sameynay Adeegga ku Goonida ah iyo in adeegyada caafimaadka deegaanka ay ka warqabaan in shaqooyinkan ay dhici doonaan waxayna kugu taageeri karaan in aad nala soo xiriirto haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Waan idinku mahadinayaa,



Alistair Watters